



10 March 2021

Waalidiinta iyo Daryeelayaasha Qaaliga Ahaaw

Waan hubaa in aad faraxsan tahay maadaama carruurta oo dhan ay dib ugu noqonayaan iskuulka toddobaadkan ka-dib xannibaaddii ugu dambaysay. Tani waxay inna siinaysaa rajo ah in aannu bilownay safarkii aan ugu bixi lahayn xaaladdan iyada oo xannibaado badan la qaadi doonno goor dambe oo sannadkan ah.

Aad ayaad ugu mahadsan tahay dulqaadkaaga iyo adkeysigaaga intii lagu guda jiray waqtiyadan adag. Waxaad taageertay barashada ka dhacaysa internet-ka annaga oo maareynayna noloshaada shaqada iyo mas'uuliyadaha guriga – midkoodna ma sahalanayn. Si kugu filan kuguma mahadcelin karno dhammaan dadaalka aad gelisay si aad u taageerto bulshada iskuulkeenna Hammersmith iyo Fulham sannadkii la soo dhaafay.

Mudnaanteenna hadda waa xaqiijinta iskuullada in ay noqdaan meelo amaan ah oo ay wax ku bartaan carruurtaada iyo hawlwadeennada iskuulkeenna. Waxaan qireynaa in daldalloolo xagga barashada ah ay ka dhasheen xilligii xannibaaddan taas oo sidoo kale u baahan in wax laga qabto. Waxaannu kala shaqeynaynaa iskuulladeenna si loo xaqiijiyo in ay haystaan kheyraadyada ay u baahan yihiin si loo bixiyo manhaj adag toddobaadyada iyo bilaha soo socda.

Cudurka safmarka ah weli ma dhammaan, waanna in aan feejiganaanaa inta xannibaadaha ay sii fududaanayaan iyo in la sii wado in la raaco hagidda dowladda ee 'gacmaha, wejiga iyo goobta' si qof kasta loo nabadgeliyo. Tani gaar ahaan waa muhiim marka loo qaadayo ama laga soo qaadayo cunugaaga iskuulkaaga. Haddii aad qabto wax walaacyo ah oo ku saabsan dib ugu noqoshada iskuulka ee cunugaaga kuwan waa in lagala munaaqashoodo iskuulka cunugaaga si loo heli siyaabahii lagu taageeri lahaa.


Farqiga ugu weyn oo ay tahay in laga warqabo ee ku saabsan dib ugu noqoshada iskuulka waa in dhammaan iskuullada oo dhami ay hadda ay macallimiinta ka baari doonnaan baaritaannada qulqulka laba jeer toddobaadkii, iyada oo dugsiyada sareenna ay ardayda baari doonnaan. Haddii loo baahdo,

qoysaska ku dhaqan Hammersmith iyo Fulham ayaa sidoo kale laga yaabaa in ay xajistaan baaritaannada mid ka mid ah xarumaha ballan la'aanta la iska tago. Faahfaahin dheeraad ah ayaa waxaa laga heli karaa halkan. Carruurta ay da'doodu ka yar tahay 12 sano waa in la baaraa iyada oo la adeegsanayo baaritaannada qulqulka ee loo yaqaanno Lateral flow, haseyeeshee haddii bukaan ama daryeele ahaan aad ka walaacsan tahay in cunugaaga uu qabo astaamaha fayraska korona, fadlan codso baaritaanka PCR mareegtada NHS.

Waxaan run ahaantii rajaynaynaa in cunugaagu uu ku raaxaysto in uu dib ugu soo noqdo iskuulka iyo dib ula xiriiridda saaxiibadooda.

Ilaali bedqabkaaga iyo fayoqabkaaga.

Si daacad ah



On behalf of:

Jan Parnell
Director Education

&

Linda Jackson
Director COVID-19 response & recovery